Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

**Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare**

# AASAASKA NAXWAHA AF SOOMAALIGA

**MUQDISHO, 1973**

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare

AASAASKA

# NAXWAHA

AF SOOMAALIGA

MUQDISHO, 1973

*Waxaa qoray, iskuna hagaajiyey ragga hoos ku qoran, kuwaas oo ka tirsan Guddiga Af Soomaaliga:*

| | |
|---|---|
| — Cabdullaahi Xaaji Maxamuud «Insaaniya» | Guddoomiye |
| — Cumar Aw Nuux Maxamed | Guddoomiye Ku-xigeen |
| — Axmad Cartan «Xaange» | Xoghaye |
| — Xuseen Shiikh Axmad «Kaddare» | Xubin |
| — Muuse X.Y. Galaal | » |
| — Maxamed Shire Maxamed | » |
| — Shire Jaamac Axmad | » |


Buuggan waxaa lagu Daabacay MADBACADDA QARANKA - XAMAR

**MUQDISHO, 1973**

# ARAR

Afka laysku garto ama lagu wada hadlo waa waxa keliya ee dadku uu uga duwan yahay xayawaanka kale, maxaa yeelay qofku wuxuu ra'yigiisa ku caddeysan karaa, ama uu ugu gudbin karaa dadka kale wuxuu doonayo waa Afka.

Afku wuxuu ka sameysan yahay erayo; erayaduna waxay ka unkan yihiin codad. Codadka tiradoodu ma badna oo waa la koobi karaa, hase yeeshee erayadu way faro badan yihiin.

Waagii hore codadka waxaa loogu isticmaali jirey inay isku gartaan inta markaas wada joogta ama ismaqli karta oo keliya. Dabadeedse dadkii waxay garteen in cod walba loo yeelo summad ama xaraf u gaar ah, si ay ugu suurogasho in dad kala fogi ay isu gaarsiiyaan hadalkooda, ayna u gartaan ulajeeddada laga leeyahay.

## AF SOOMAALIGA

Af Soomaaligu waa af aad iyo aad u ballaaran ee hodan ah, erayadiisuna aad bay u tiro badan yihiin. Af Soomaaligu wuxuu ka mid yahay afafka da'da weyn, waxaana u marag ah suugaanta qoddada dheer ee qarniyaalkii la soo maray ay waxba ka beddeli kari waayeen. Afkeennu wuxuu ku fac tirsadaa, lana walaal yahay afafka KUSHIITIGA, dunidu maanta waxay qirsan tahay Af Soomaaligu inuu yahay af aan doorsoomin, una qaybsaneyn lahjado faro badan.

## NAXWAHA

Barashada afku ma aha inaad garatid erayada iyo micnahooda oo keliya ee waa inaad baratid sida hagaagsan ee erayadu isu raaci karaan iyo sida ay isula shəqayn karaan, taas oo lagu gaari karo barashada Naxwaha Afka. Naxwuhu wuxuu ka sameysan yahay xeerar wada shaqeeya, laguna barto sida wanaagsan ee Afka loogu hadlo, loona qoro. Naxwuhu wuxuu u kala baxaa saddex qaybood :

— Qaybta hore waxaa lagu magacaabaa CODAD, waxaana laga bartaa sida loogu dhawaaqo iyo sida loo qoro erayga.

— Qaybta labaad waxaa lagu magacaabaa QAYBTA HADALKA, waxaana laga bartaa eray kasta qaybta uu ka tirsan yahay.

— Qaybta saddexaad waxaa lagu magacaabaa DHISMAHA WEERAHA, waxaana laga bartaa sida hagaagsan ee qaybaha hadalku ay isu raacraaci karaan marka la dhisayo weeraha oona la doonayo in laga ilaaliyo qaladka ka iman kara xagga NAXWAHA.

## GABAGABO

Buuggan waxaa loogu talagalay inuu noqdo AASAASKA NAXWAHA AF SOOMAALIGA, wuxuuna si kooban oo tifaftiran uga sheekaynayaa codadka iyo qaybaha hadalkeennu uu ka kooban yahay. Rajo weynna waxaa laga qabaa, buuggani inuu noqdo mid ay ka faa'iideystaan dadka Soomaaliyeed ee u soo jeestey inay meel wanaagsan ka gaaraan dhismaha iyo hufnaanta AFKOODA HOOYO.

GUDDIGA AF SOOMAALIGA

Muqdisho, 1973.

# Codadka

Codadka ama dhawaaqa afkeennu waxay u kala baxaan laba jaad. Kuwaas oo ah:

a) *Shaqallo*:

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| i) sida: | A - a: | Af | - AA - aa: | Aar |
| | E - e: | Edeg | - EE - ee: | Eebo |
| | I - i: | Il | - II - ii: | Iil |
| | O - o: | Or | - OO - oo: | Ood |
| | U - u: | Ul | - UU - uu: | Uur |

ii) HAMSADA (') oo ah cod shaqallada kale la socda,

sida: da' le'eg ri' lo' gu'.

b) *Shibbaneyaal,* sida: B T J X KH D R S SH DH C
G F Q K L M N W H Y.
b, t, j, x, kh, d, r, s, sh, dh, c,
g, f, q, k, l, m, n, w, h, y.

QAYBTA HADALKA

Hadalka xubnihiisa waaweyni waxay guud ahaan u kala baxaan sagaal qaybood. Kuwaas oo ah: Qodob, Magac, magac-uyaal, tilmaame, fal, falkaab, xiriiriye, meeleeye iyo yaab.

# Qodob

Qodobbadu waa qayb ka mid ah hadalka, gadaalna ka raacaa magaca. Qodobbaduna waa toddoba:

Markay magac keli ah la socdaan;

Afar waa lab, sida: ka, ga, ha, a.

Saddexna waa dheddig, sida: ta, da, sha.

*Tusaale*:

LAB

1. Faras*ka* Xuseen caws u dhig.
2. Fura*ha* keen aan aqalka furee.
3. Intaynaan tegin guri*ga* xir.
4. Loo*xa* tirtir.

DHEDDIG

5. Inan*ta* aqalka ku jirta u yeer.
6. Mindi*da* soofee.
7. Caasha waxa laga hayaa caloo*sha.*

Haddii aan qodobbada hoosta ka xarriiqan ka reebno magacyada, waxa haraya magaca oo keliya oo aan kaaga duwaneyn magacyada kale, sida: Faras, Fure, Loox, Mindi, inan iwm.

Haddiise qodob la raaciyo, waxaynu oran karnaa «Farasku» waa mid aynu isla naqaan oo inooga duwan fardaha kale.

*Digniin*

a) Waxa jira magacyo dheddig oo markay keli yihiin qaata qodobka (a), sida gabadha, saca, iwm.

b) Haddiise magacyada wadar laga dhigo isla toddobadii qo-

dob ayaa gadaal ka raacaya, laakiin boqolkiiba 95% way isweydaartaan. Qodobkii keligii labka ahaa dheddig buu isu beddelaa haddii isla magicii uu la socday wadar laga dhigo. Qodobbada dheddigna sidoo kale way isbeddelaan.

| *Keli* | *Wadar* |
|---|---|
| Wiil*ka* | Wiila*sha* |
| Libaa*xa* | Libaaxya*da* |
| Kursi*ga* | Kuraas*ta* |
| Fura*ha* | Furayaa*sha* |
| Far*ta* | Fara*ha* |
| Magaala*da* | Magaalooyin*ka* |
| Arday*ga* | Arda*da* |

L a y l i :

1. Magacyadan qodob ku dar:
   Foox, qoor, baal, beel, ciddi.
2. Magacyadan qodobka ka reeb:
   Boogta, booca, waddada, macasha, maaxda.

## *Magac*

Magucu waa qayb ka mid ah hadalka, wuxuuna ku tusaa dad, xoolo, bahallo, geedo, iwm. Sida: Cali - Kaaha; Faras - Sac; Libaax - Abeeso; Qurac - Moos; Dhagax, Qorrax, Qurux, Aqoon iwm.

Magacu wuxuu u kala baxaa: *Magac Guud* iyo *Magac Gaar*.

# ***Magac Guud***

Magac Guud waa magaca loo siman yahay, wuxuuna u kala baxaa magac muuqda iyo magac qarsoon:

1. *Magac muuqda*:

Magac muuqda waa magaca la arki karo ama la taaban karo.

*Tusaale*:

1. *Dawacadu* wax ka dhagar badan.
2. *Kursi* iyo *Miis* baa wax lagu qori karaa.
3. Haddaad wax baranaysid ha illaawin *buug* iyo *qalin.*
4. Reer miyigu waxay wax ku ootaan *godin iyo hangool.*
5. Xoolaha waxa laga helaa: *Caano, Cad, Subag* iyo *Hargo.*

2. *Magac Qarsoon*:

Magac qarsooni waa kan aan la arki karin, lana taaban karin.

*Tusaale*:

1. Dadka *xoogga* lihi waa inay dadka *taagta* daran wax taraan.
2. *Aqoon* la'aani waa *iftiin* la'aan.
3. *Diintu nuur* bay u tahay dadka.
4. *Run* iyo *beeni* kala raad leh.
5. *Geesinnimada* waa loo dhashaa.

# *Magac Gaar*

Magac Gaar waa magaca u goonnida ah noolka ama moodka.

*Tusaale*:

1. *Xamar* waa magaalamadaxda dalka Soomaaliya.
2. Gumeysi xun bay *Afrika* soo martay.
3. *Siyaad* waa macallinka Tawradda.
4. *Qorraxdu* waa nolosha nafleyda.
5. Dalkeenna xagga bari waxa ka xiga *Badweynta Hindiya.*

Layli:

1. Waxad qortaa toban magac oo guud iyo shan magac oo gaar, kana duwan kuwa casharka lagu sheegay.
2. *Magacyadan u kala saar guud iyo gaar*:

   qalin, Berbera, qaaddo, Kismaayo, lacag, dhalo, Sunguuni, yaxaas, Hiiraan, qorrax.
3. *Magacyada muuqda iyo kuwa qarsoon kala saar*:

   Xaashi, webi, balli, naxariis, kursi, murti, miis, hantiwadaag, iskaashad, geesinnimo.
4. *Erayadan magacyo qarsoon u rog*:

   fuley, cun, cab, tol, qor, gaaban, dheer.

# *Cayn Magac*

Magacyadu waxay u kala baxaan lab iyo dheddig. Caynka magacana waxa lagu gartaa qodobka gadaal ka raaca.

*Tusaale*:

*Magacyada Lab*

1. *Koobka* shaah ku shub.
2. *Ratiga* noo soo dhaami.
3. *Waraabaha* ninkan baa diley.
4. *Duqa* magaaladu waa waxtar
5. Haddaad wiil la cayaarto *booca* lama qabto.

*Tusaale*:

*Magacyada Dheddig*

1. *Naagta* gaarida ah gurigeedaa lagu gartaa.
2. Ninkii *kabta* kuu yeelay haatan ma joogo
3. *Qorraxdu* wax ka iftiin badan.
4. Mindida *carruurta* ka fogee.
5. *Dhiishu* ma arjeeg baa mise waa qabo.

# *Tiro Magac*

Tirada magacu hadba si bay noqotaa, waxayna u kala baxdaa: keli, wadar iyo koox.

## KELI LAB

Magacyada lab ee kelida ah waxa ka mid ah: roob, faras, nin, buug, arday, iwm.

## WADAR LAB

1. Magac lab ee dhawaaqa keliya ahi wuxuu wadar ku noqdaa shibbanaha u dambeeya oo mar labaad la qoro, ''a''na horay laga raaciyo; sida: dab - dabab, mas - masas, wiil - wiilal, raad - raadad, doob - doobab. iwm.
2. Magac lab ee ka badan dhawaaq keliya, xarafka ugu dambeeya baa labanlaabma, waxaana gadaal laga raaciyaa ''o'', sida: dabar - dabarro, hadal - hadallo, albaab - albaabbo, wadaad - wadaaddo, iwm.
3. Magaca lab ee kelida ah ee ku dhammaada ''e'' waxa gadaal ka raaca ''yaal'' sida: koore - kooreyaal, buste - busteyaal, waraabe - waraabeyaal, tuke - tukeyaal, iwm.
4. Magaca lab ee kelida ah ee ku dhammaada ''y'' waxa gadaal ka raaca ''aal'' sida: oday - odayaal, fuley - fulayaal. iwm.
5. Magicii Af Carbeed ka yimid gadaal baa laga raaciyaa ''iin'' sida: macallin - macallimiin, mulxid - mulxidiin, muslim - muslimiin, iwm.
6. Magacyada lab ee kelida ah ee ku dhammaada ''n'' qaarkood waxa raaca ''mo'', ''n'' dana waa laga tagaa, sida: firin - firimo, arrin - arrimo, qalin - qalimo, inan - inamo, iwm.

   Qaarkoodna ''n''da waxa beddela ''m'', ama waa la raaciyaa sida: nin - niman, suun - suuman, iwm.
7. Magacyo codka lagu kala sooco dhigmaduse isku si tahay sida: di'bi - dibi, a'wr - awr, ma'dax - mada'x, ca'wl - cawl.

*Digniin*:

a) Xeerka dhawaaqa kelida ah waxa aan la socon erayo koo-ban, sida: reer - reero, gu' - gu'yaal, go' - go'yaal, geed - geedo, iwm.
b) Erayada "y"da ku dhammaada waxa aan la socon erayo koo-ban, sida: arday - ardo, iwm.

## KELI DHEDDIG

Magacyada dheddig ee kelida ah waxaa ka mid ah: geen-yo, naag, hal, far, iwm.

## WADAR DHEDDIG

1. Magaca dheddig ee kelida ah oo ku dhammaada shibbane, wuxuu gadaal ka qaataa "o" marka wadar laga dhigayo, sida: Naag - Naago, lax - Laxo, bad - Bado, hal - halo, iwm.
   Kuwa "n" ku dhammaadase "n"du waxay isu beddeshaa "m" gadaalna waxay ka qaataan "o" Islaan - Islaamo, haan haamo, laan - laamo, iwm.
2. Magaca dheddig ee kelida ah ee ku dhammaada "o" wuxuu gadaal ka qaataa "oyin", marka wadar laga dhigayo, sida: hooyo - hooyooyin, qaanso - qaansooyin, waddo - waddooyin, dermo - dermooyin, iwm.
3. Magaca dheddig ee kelida ah ee ku dhammaada "i" wuxuu wadar ku noqdaa "yo" oo gadaal laga raaciyo, sida: ri' - riyo, ciddi - ciddiyo, mindi - mindiyo, xaashi - xaashiyo, iwm.

*Gundhig :*

Magaca dheddig ee kelida ah ee ku dhammaada shib-bane aan "n" ahayn, marka wadar laga dhigayo, wuxuu gadaal laga raaciyaa "mo" nuunkana waa laga tagaa.

gadaal lga raaciyaa ”mo” nuunkana waa laga tagaa. Haddii uu ”o” ama ”i” ku dhammaadase, waxa gadaal ka raaca ”oyin” ama ”yo”.

*Layli:*

a) *Magacyadan wadar dheddig ka dhig:*

geenyo, nirig, jaan, marwo.

b) *Magacyadan keli dheddig ka dhig:*

gabdho, halo, eeddooyin, tuulooyin.

## KOOX

Koox waxa la yiraahdaa magaca aan kelida lahayn, sida : xayn, kadin, geel, haween, rag, iwm.

*Tusaale:*

- *raxan* maroodi ah baa beerihii cuntay.
- shalay waxa aan soo maray gabar *xayn* ari ah la joogta.
- mararka qaarkood *dhallinyaradu kadin kadin* bay *geela* u kala raacaan.
- 21ka Oktoobar, hadba *koox* dayuurada ah baa dusheenna ku dabbaaldega.
- reer miyiga qofkii tiro *ari* ah lihi waa qof ladan.
- *carruurta* reer miyigu *maqasha* si fiican bay u ilaaliyaan.
- *dad* badan baa ka qayb galay maadeyskii xalay.

- *rag* iyo *haweenba* maanta waxa heegan loo yahay dhismaha waddanka.
- waddankii aan *hub* ku filan haysan waa loo yaabaa.
- aqalkan arooska ah *alaab* cusub baa hoos taal.
- fuleygu wax ka *qalab* badan waxna kuma taro.
- xilliga roobka *xooluhu* way *caano* badan yihiin, jiilaalkase way *biyo* cab badan yihiin.

*L a y l i :*

1. Waxaad qortaa toban weerood oo kooxi ku jirto.

2. *Hadalladan dhamays tir :*

1. Waxaan arkay .................................................. dayuurado ah.
2. Waxaan iibsaday .................................................. ido ah.
3. Weli ma la kulantay .................................................. maroodi ah ?
4. Guriga hanuuninta waxa jooga .................................................. fara badan.
5. .............................. kaa badan iyo, .............................. kaa badaniba way ku hafiyaan.

## LAMMAANE

Lammaane waxa la yiraahdaa laba eray ama in ka badan oo laysku daray isku eray keliyana noqday. Kuwaas oo caddeeya ulajeeddo keliya; waxayna u qaybsamaan jaadad badan.

Qaybahaasna waxa ka mid ah :

- Laba magac, sida : Abbaanduule,
- magac iyo tilmaame, sida Baardheere.
- magac iyo fal, sida : Dhagaxtuur.
- magac, meeleeye iyo fal, sida : Ceelkageeye.
- laba tilmaame, sida : Xamarcas.

*Tusaale*:

1. *Madaxweynaha* Jamhuuriyaddu wuxuu mudan yahay ammaan iyo maammuus.
2. Xamaaratada waxa ka mid ah *masalugaley.*
3. Qaansaroobaaddu way qurux badan tahay.
4. Dhallinta waqtigan qaarkeed waxay door bidday inay noqoto *"timoweyn"*.
5. Waddanka waxa ku batay *afmiinshaar.*
6. *Cirsankayeerku* waa shi'mbir roobka sheega.
7. *Xamarweyne* waa xaafadda ugu da' weyn *magaalama-daxda* dalka.
8. Yaa arkay ina *cagabaruur?*

L a y l i :

1. Qaybaha lammaanaha mid kasta laba ka qor.
2. *Weerahan lammaanayaal ku buuxi*:

   Xamar waa ........................................ dalka Soomaalida.

................................................ waa masaajidka ugu da'weyn.

Taallada ................................................ Xamar bay ku taallaa.

## *Magacuyaal*

Magacuyaalku waa eray jagada magaca gala, qodobna qaata, hadalkana qurxiya, soona gaabiya. Wuxuuna reebaa ku celcelinta magaca, sida:

Xasan carruurtii buu doonay.

*Isaga* iyo *iyaguba* way yimaaddeen.

Magacuyaalladu waxay u kala baxaan shan qaybood. Kuwaas oo ah:

1. Magacuyaal dad,
2. » lahaansho,
3. » tusmo,
4. » su'aaleed,
5. » noqod.

1. *Magacuyaal dad*:

*Tusaale* (1)

| *Keli* | *Wadar* |
|---|---|
| Aniga | Annaga |
| Adiga | Innaga |
| Isaga | Idinka |
| Iyada | Iyaga |

*Tusaale* (2)

| *Keli* | *Wadar* |
|---|---|
| aan | aannu |
| aad | aynu |
| uu | aydin |
| ay | ay |

*Tusaale* (3)

| *Keli* | *Wadar* |
|---|---|
| i | na |
| ku | ina |
| | idiin |

*Tusaale* (4)

| *Keli* | *Wadar* |
|---|---|
| ii | noo |
| kuu | inoo |
| u | idin |
| u | u |

2. *Magacuyaal Lahaansho*:

Magacuyaal lahaansho waa eray muujiya lahaanta ama mul-

kiga cid ama wax leeyihiin, sida: Guriga Cali waa mundul, *kayguse* waa daar.

*Tusaale*:

| *Keli Lab*: | *Keli Dheddig* |
|---|---|
| 1. Kayga | Tayda |
| 2. Kaayga | Taada |
| 3. Kiisa | Tiisa |
| 4. Keeda | Teeda |

W A D A R

| | |
|---|---|
| 5. Keenna | Teenna |
| 6. Kayaga | Tayada |
| 7. Kiinna | Tiinna |
| 8. Kooda | Tooda |

3. *Magacuyaal Tusmo*:

Magacuyaal tusmo waa eray tilmaama dhowaanta ama fogaanta wax ama meeli jirto, sida:

*Kan* ugu hormaray beretenkii dugsiga Macallin Jaamac waa Abshir, *Tan* ku xigteyna waa Kaaha. *Kuwa* kalena aad bay u fiicnaayeen.

*Tusaale:*

| *Keli lab* | *Keli dheddig* | *Wadar* |
|---|---|---|
| Kan | Tan | Kuwan |
| Kaas | Taas | Kuwaas |
| Koo | Too | Kuwoo |
| Keer | Teer | Kuweer |

4. *Magacuyaal Su'aaleed:*

   Kee, tee, kuwee, yaa.

*Tusaale:*

- Kee baa yimid shalay?
- Tee baa dhashay inanka?
- Kuwee baad ku aragtay gegida dayuuradaha?
- Yaa la yiraahdaa Mahad?

5. *Magacuyaal noqod,* waa "is" oo falka xagga hore ka raaca. Ridii way *is*nuugtey, nin baa *is*dilay.

   Carruurtii way *is*laayeen, nimankii way *is*wareysteen.

Layli:

1. Qor saddex weerood oo uu ku jiro magacuyaal tusmo (lab, dheddig iyo wadar).
2. Erayga "is" lix weerood geli, sida *Isdhiibey;* cadowgii baa *is*dhiibey.

3. Qor shan weerood oo mid kasta uu ku jiro magacuyaal lahaansho.

## *Tilmaame*

Tilmaame waa eray ka mid ah qaybaha hadalka. Wuxuu raacaa magaca, tilmaan cadna wuu ka bixiyaa.

Tilmaamayaasha waxaa ka mid ah: tilmaame ahaansho, tilmaame lahaansho, tilmaame tusmo, tilmaame su'aaleed iyo tilmaame tiro, iwm.

*Tusaale*:

1. Waxa qoslay wiil *yar*.
2. Maalin walba waa inaad dhaqdaa jirkaa*ga*.
3. Bal u yeer nin*kaas*.
4. Dadka meesha tubani waa *shan* nin iyo *lix* naagood.
5. Nin*kee* baa qalin haysta?

Layli:

1. Tilmaamayaasha intee baad ka taqaan?
2. Tilmaamuhu muxuu qaataa?
3. Qor 3 weerood oo tilmaamayaal kala jaad ah ay ku kala jiraan?

### TILMAAME AHAANSHO

Tilmaame ahaansho waa eray qeexa magaca, wuxuuna ku shaqeeyaa tiraraac ee kuma shaqeeyo caynraac.

*Tusaale*:

1. Waa nin *weyn* oo caqli *badan.*
2. Waa guri *yar* oo *qurxoon.*
3. Waa gabar dhiil *culus* sidda.
5. Waxaan soo maray jid *toosan.*
4. Xafiiska miis *fudud* ka soo qaad.

Sida hoos ku qoran, tilmaame ahaanshaha, qoristiisu way isbeddeshaa, haddii uu ka hor maro magac wadar ah, magacaasu lab ha ahaado ama dheddigba.

*Tusaale*:

| | |
|---|---|
| Nin *weyn* | Niman *waaweyn* |
| Gabar *cas* | Gabdho *cascas* |
| Naag *gaaban* | Naago *gaagaaba*n |
| Jid *dheer* | Jidad *dhaadheer* |
| Qori *dhuuban* | Qoryo *dhuudhuuban* |

## TILMAAME LAHAANSHO

Tilmaame lahaansho wuxuu caddeeyaa qofku wuxuu leeyahay, wuxuuna ku shaqeeyaa *tiro iyo cayn raac* labadaba.

*Tusaale*:

| *Keli Lab* | *Keli Dheddig* |
|---|---|
| Dal*kayga* | Daar*tayda* |
| Dal*kaaga* | Daar*taada* |

Dal*kiisa*
Dal*keeda*

Daar*tiisa*
Daar*teeda*

### W a d a r

Dal*kayaga*
Dal*keenna*
Dal*kiinna*
Dal*kooda*

Daar*tayada*
Daar*teenna*
Daar*tiinna*
Daar*tooda*

— Waxaan dhowraynaa sharafta dad*kayaga*
— Waxaad u shaqeynaysaa horumarinta dal*kaaga*
— Wuxuu u dhimanayaa xoreynta dad*kiisa*
— Waxay tacliin baraysaa carruur*teeda*
— Waxaan dhiseynaa dhaqaalaha dal*keenna.*
— Waa inaad wax barataan carruur*tiinna*
— Dadka qaar waxa ay u shaqeystaan caloo*shooda*
— Xaashidan ha ku taaban far*taada*
— Ushaadu kama dheera usha*yada*
— Haweeneydu biyey ku shubtay haan*teeda*
— Wiilkiisu waa da'*deenna*
— Nimankii shaqadooda ka bixi waaya lama rabo hadal*kooda.*

L a y l i:

1. *Erayadan tilmaamayaal ku habboon ku dar, kaddibna weero geli.*
   Jidad, mashruuc, dawlad, dadweyne, faras, libaax, tuke, arday.
2. *Meelahan bannaan, tilmaamaha ku habboon geli:*

shalay waxaan gaarey Xamar ..........................................................................

waxaan la kulmay afar wiil oo ..................................................................

iyo saddex gabdhood oo ............................................................................

kubbad ............................................................ bay ku cayaarayeen.

wiilashu dhar ........................................................ bay gashanaayeen,

baruhuna dhar ............................................................. Kolkaan soo

noqday, dhabbaha ................................................ baan soo qaaday.

## TILMAAME TUSMO

Tilmaame tusmo wuxuu caddeeyaa waxa laga hadlayo dhowaantooda ama fogaantooda.

*Tusaale*:

| *Keli lab* | | | *Keli dheddig* | | | | *Wadar* |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Kan | - | Ninkan | Tan | - | Naagtan | - | Kuwan |
| Kaas | - | Ninkaas | Taas | - | Naagtaas | - | Kuwaas |
| Koo | - | Ninkoo | Too | - | Naagtoo | - | Kuwoo |
| Keer | - | Ninkeer | Teer | - | Naagteer | - | Kuweer |

1. Weligaa ha aamminin nin*kan*
2. Waxaad runta weydiisaa nin*kaas*
3. Ii nadiifi miis*koo*
4. Raggan waan wada aqaan nin*keer* maahee
5. Far*tan* waan qori aqaan

6. Waxaad ii keentaa kutub*taas*

7. Wuxuu rabaa bir*too*

## TILMAAME TIRO

Tilmaame tiro wuxuu hore iyo gadaalba ka raacaa magaca, wuxuuna tilmaan kaa siiyaa inta magaca tiradiisu tahay, wuxuuna u qaybsamaa kowle iyo kowaadle, sida:

*Shan nin*: *Ninka shanaad*

| | *Kowle* | *Kowaadle* | |
|---|---|---|---|
| 1. | Kow | Kowaad | (1d) |
| 2. | Laba | Labaad | (2d) |
| 3. | Saddex | Saddexaad | (3d) |
| 4. | Afar | Afraad | (4d) |
| 5. | Shan | Shanaad | (5d) |
| 6. | Lix | Lixaad | (6d) |
| 7. | Toddoba | Toddobaad | (7d) |
| 8. | Siddeed | Siddeedaad | (8d) |
| 9. | Sagaal | Sagaalaad | (9d) |
| 10. | Toban | Tobnaad | (10d) |
| 20. | Labaatan | Labaatanaad | (20d) |
| 30. | Soddon | Soddonaad | (30d) |
| 40. | Afartan | Afartanaad | (40d) |
| 50. | Konton | Kontonaad | (50d) |
| 60. | Lixdan | Lixdanaad | (60d) |
| 70. | Toddobaatan | Toddobaatanaad | (70d) |
| 80. | Siddeetan | Siddeetanaad | (80d) |
| 90. | Sagaashan | Sagaashanaad | (90d) |
| 100. | Boqol | Boqolaad | (100d) |
| 1000. | Kun | Kumaad | (1000d) |

*Tusaale:*

*Afarta* nin kan *labaad* la hadal.

*Lixda* kursi kan *shanaad* wuu jaban yahay.

*Tobanka* arday kan *sagaalaad* wuu dhacay.

Tiradu magaca lab wadar kama dhigi karto, magaca dheddigse way ka dhigtaa, sida:

| *Lab* | *Dheddig* |
| --- | --- |
| Toban nin | Afar naagood |
| Labaatan guri | Toban ulood |
| Soddon wan | Sagaal riyood |
| Shan beled | Boqol beerood |
| Kun askari | Labaatan farood |

L a y l i :

1. *Magacyadan tilmaame tiro ku dar:*

| | | | | |
| --- | --- | --- | --- | --- |
| 1. | *Shan* | inan | 1. inanka | *shanaad* |
| 2. | ........................ | wiil | 2. ........................ | ........................ |
| 3. | ........................ | halaad | 3. ........................ | ........................ |
| 4. | ........................ | dugsi | 4. ........................ | ........................ |
| 5. | ........................ | sano | 5. ........................ | ........................ |
| 6. | ........................ | tuulo | 6. ........................ | ........................ |
| 7. | ........................ | xuunsho | 7. ........................ | ........................ |

2. Waxaad qortaa tirada 1 - 10 adoo ku tirinaaya kowle, dabadeedna tobnaadka ilaa boqolka.

3. Magacyadan dheddig wadar ka dhig, tilmaame tirana ku dar, sida: lix gacmood.

.................................................. il, bil, saan, haan, ri', bir.

## TILMAAME SU'AALEED

Tilmaame su'aaleed waa qurubka magaca dhammaadka ka raaca.

*Tusaale*:

1. Far*tee* af Soomaaliga lagu qoray?
2. Waddan*kee* mooskeenna loo dhoofiyaa?
3. Dawlad*dee* u hor martay dayaxa guudkiisa?
4. Guri*gee* iskaashi lagu dhisay?
5. Us*hee* maska lagu dhuftay?
6. Fure*hee* kaa lumay?
7. Se*cee* baa ciyey?

Layli:

Qor shan weerood oo tilmaame su'aaleed ku jiro, kana jawaab.

# *Fal*

Falku waa qayb hadalka ka mid ah, wuxuuna caddeeyaa wax kasta oo la falo ama la sameeyo la'aantiisna hadalku macne

ebyan ma yeelan karo, sida: cab, caddee, qoslay, cunayaa, qoraa, liqi, doonaa, iwm.

*Tusaale*:

1. Geelle wuu qoslayaa.
2. Shimbirtu way duushaa.
3. Geeddi hurdada ayaa laga toosin doonaa.
4. Dariishadda fur
5. Mukulaashii way dhimatay.
6. Wiilku wuu yar yahay.

2. *Isrogrogidda falka.*

Isrogrogidda falku wuxuu ku dhisan yahay fal amarka qofka labaad ee kelida ah (adiga) iyo dadka badan ee labaad (idinka). Labadaas qof ama kooxood oo keliya baana la amri karaa.

Isrogrogidda fal amarku wuxuu u qaybsamaa:

1. Fal amar ku dhammaada xaraf shibbane ah, sida: hor, gub, xus, dil, doox, qaad, cab, iwm.

*Tusaale*: (1)

1. Biyaha *cab*.
2. Libaaxa *dil*

2. Fal amarka ku dhammaada shaqal gaaban, sida: kari, bogo, qari, qabo, iwm.

   1. Hawsha *bogo*.
   2. Hilibka *kari*

3. Fal amar ku dhammaada shaqal dheer, sida: samee, bislee, marsii, cabsii, iwm.

1. Maro *samee.* 2. Hilibka *bislee.*

4. Fal amar ku dhammaada xarfaha "ay" ama "aw" "ow", sida: weynow, imaw, hay, ray, iwm.

1. Berri *imaw.* 2. Caynaanka *hay*

## 3. FAL EBYANE

Fal ebyanuhu waa falka gadaal keliya iska beddela marka la rogrogayo ee aan jirriddiisu beddelmin.

Fal ebyanaha waxa ka mid ah: gub, cun, liq, shid, iwm. Bal u fiirso fal ebyanaha "gub" sida uu gadaal isaga rogrogo :

*Tusaale*:

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | (anigu) | cawskii | waan gubey |
| 2. | (adigu) | » | waad gubtey |
| 3. | (isagu) | » | wuu gubey |
| 4. | (iyadu) | » | way gubtey |
| 5. | (annagu) | » | waannu gubney |
| 6. | (innagu) | » | waynnu gubney |
| 7. | (idinku) | » | waad (waydin) gubteen |
| 8. | (iyagu) | » | way gubeen |

## 4. FAL MA-EBYANE

Marka la rogrogayo fal ma-ebyanaha jirriddiisu waxay iska beddeshaa horay, gadaal iyo dhexdaba.

Fal ma-ebyanaha waxa ka mid ah: imaw, dheh, oollow, aqood, ahaw, iwm.

*Tusaale*:

1. (anigu) waan *imid*
2. (adigu) waad *timid*
3. (isagu) wuu *yimid*
4. (iyadu) way *timid*
5. (annagu) waannu *nimid*
6. (innagu) waynu *nimid*
7. (idinku) waad (waydin) *timaadeen*
8. (iyagu) way *yimaadeen*

Layli:

1. Erayadan mid kasta siddeedii goor rogrog:
   rar, hor, beer.
2. Qor shan fal oo ku dhammaada shibbane.
3. Qor shan fal oo ku dhammaada shaqal.

## 5. FAL GARGAARE

Fal gargaarayaasha waxaa ka mid ah: jirey, lahaa, karaa, doonaa. Fal gargaaruhu wuxuu macnihiisa caddeeyaa hadba falka uu gadaal ka raaco.

*Tusaale*:

1. Muqdisho waan tegi *jirey*.
2. Muqdisho waan tegi *doonaa*.
3. Haddaad Cali arki lahayd warka waad u sheegi *lahayd*.

4. Burco waan tegi *karaa.*

## 6. WAQTIGA FALKA

Waqtiga falku wuxuu muujiyaa goorta wax dhacaan ama qabsoomaan, wuxuuna u qaybsamaa waqti tegey, waqti jooga iyo waqti iman doona.

*Tusaale*:

a) *Fal Ebyane*:

1. *Waqti tegey* - cawska waan gubey.
2. *Waqti jooga* - cawska waan gubayaa.
3. *Waqti iman doona* - cawska waan gubi doonaa.

b) *Fal ma-ebyane*:

1. *Waqti tegey* - eray baan iri.
2. *Waqti jooga* - eray baan oranayaa.
3. *Waqti iman doona* - eray baan oran doonaa.

## 7. HABKA FALKA

Habka falku wuxuu caddeeyaa ama tifaftiraa sida ama habka falku u dhaco; wuxuuna u kala baxaa afar jaad.

*Tusaale :*

1. *Ogeysiin :* Warqad baan *qoray.*
2. *Amar :* Warqadda *qor.*

3. *Madhacdo :* haddaan wax baran lahaa, shaqo ma aan waayeen.

4. *Su'aal :* Yaad warqadda u *qortay ?*

## 8. FAL AHAANSHO

Fal ahaanshuhu wuxuu caddeeyaa waxa laga hadlayo waxa ay yihiin, waxaana ka mid ah : ah, waa iyo weeye.

*Tusaale :*

1. Waran bir *ah* gado.
2. Cali *waa* nin madow.
3. Cali nin *weeye.*
4. *Waa* Cali.

## 9. FAL GUDBE

Fal gudbuhu waa falka la yimaada yeelaha iyo layeelaha.

*Tusaale:*

1. Gabadhu wiil bay *aragtay.*
2. Ninku libaax buu *diley.*
3. Wiilku koob buu *qaaday.*

## 10. FAL MAGUDBE

Fal magudbuhu waa falka qaata yeele keliya ee aan qaadan karin layeele.

*Tusaale*:

1. Shimbir baa *ciday.*
2. Ninkii wuu *seexday.*
3. Fulaygii baa *cararay.*

Layli:

1. Sheeg fal gargaaraha kuna muuji weero gaar ah.
2. Qor afar tusaale oo uu ku jiro fal ebyane iyo afar uu ku jiro fal ma-ebyane.
3. Waa maxay fal gudbe iyo fal magudbe?
4. Falalka soo socda, midba shan tusaale ka qor: fal ahaansho, fal gudbe, fal magudbe.

## *Falkaab*

Falkaab waxa la yiraahdaa erayada caddeeya sida wax u dhacaan ama u qabsoomaan. Falkaabyadu waxay u kala baxaan: Falkaab waqti, falkaab meeleed, falkaab jaho, falkaab masaafo, falkaab siyeed iyo falkaab ra'yi.

1. *Falkaab waqti*: wuxuu caddeeyaa waqtiga ay wax dhacaan ama qabsoomaan.

*Tusaale*:

1. Cali baan *barqadii* arkay.
2. Baabuurku *hadda* ayuu ka yimid Afgooye.
3. *Shalay* baan xaashi u diray walaalkay.
4. *Casar* walba iskaa wax u qabso baan aadaa.

5. Hawshu waxay dhammaanaysaa *duhurka.*

2. *Falkaab meeleed*: wuxuu caddeeyaa meesha ay wax ku/ka dhacaan ama ku/ka qabsoomaan.

*Tusaale*:

1. Shimbir baa aqalka *dhushiisa* saaran.
2. Qalinkii wuxuu yaallaa miiska *korkiisa.*
3. Bisad baa kursiga *hoos* fadhida.
4. Ninku wuxuu hurdaa aqalka *gudihiisa.*
5. Kabaha waxa la dhigaa *dibedda.*

3. *Falkaab Jaho*: Falkaab jaho waxa weeye erayga caddeynaya xagga ama jahada ay wax u dhacaan ama u qabsamaan.

*Tusaale*:

1. Faarax wuxuu *sii* maray jid dheer.
2. Geeddi baa arigii *soo* celiyay.
3. Kursiga *xaggan* u dhig.
4 Irriddu waxay u jeedaa *bari.*

4. *Falkaab Masaafo*: Falkaab masaafo waxa weeye erayga caddeynaya fogaanta ama dhowanta wax ama meel jirto.

*Tusaale*:

1. Baabuurkii wuxuu socday afartan *mayl.*

2. Labaatan *kiiloomitir* buu askarigii rucleeyey.

3. Soddon *tallaabo* ayaan hore u qaaday.

4. Gabadhii waxay iibsatey shaal shan *dhudhun* ah.

5. *Falkaab Siyeed*: Falkaab siyeed waxa weeye erayga caddaynaya sida ay wax u dhacaan ama u qabsamaan.

*Tusaale*:

1. *Degdeg* buu Warsame igu dhaafay.

2. Guuleed baa faraska *xoog* usha ugu dhuftay.

3. Rooble caanaha geela *aad* buu u jecel yahay.

4. Qofkii *aayar* socda qodixi ma muddo.

6. *Falkaab Ra'yi*: Falkaab ra'yi waxa weeye erayga kala caddeynaya kolka ay jawaabtu tahay "haa" ama "maya".

*Tusaale*:

1. Cawaale ma aragtay?
   *Maya,* ma arag.
2. Casharkii ma baratay?
   *Haa,* waan bartay.

*Layli Guud*:

1. Waa maxay Falkaabku?

2. Falkaabku waa immisa qaybood? Magacow.

3. Sheeg falkaabka su'aasha ku yimaada.

4. *Weerahan soo socda falkaabyo ku habboon ku buuxi:*

a) Haddii aan wax weyni dhicin, calanka.................................... looma dhigo.

b) Marka aan tooso ............................................ ayaan wejiga dhaqdaa.

t) Dugsiga waxaan u........................................ raaca walaalkay.

j) ........................................................ u soco oo baabuurta iska ilaali.

x) ........................................................ baan ku sugey, markaan ku waayeyna waan lugeeyey.

5. *Weertii sax ah (/) summaddaas ku qor, tii qalad ahna* (x) *summaddan*:

a) Falkaabku waa falka oo kale (   ).

b) Falkaab meeleed wuxuu ku tusayaa waqti tegey (   ).

t) ''sii'' iyo ''soo'' waa falkaab jaho (   ).

j) ''dhudhun'', ''tallaabo'' iyo ''mayl'' waxay tilmaamayaan masaafo (   ).

x) ''Qunyar'' ''degdeg'' iyo ''dhaqso'' ma aha falkaabyo (   ).

## Xiriiriye

Waa eray qaybaha hadalka ka mid ah, wuxuuna isku xiraa erayada, oraahda iyo weeraha. Xiriiriyayaalka waxa ka mid ah :

iyo, laakiin, ama, intii, illayn, mindhaa, oo, ee, maxaa

yeelay, ilaa, - na, - se, xataa.

*Tusaale*:

1. Cali *iyo* Cumar baa yimid.
2. La furimaayo albaabka *ilaa* macallinku yimaado.
3. Waxa iga tegey baabuurkii *intii* aan soo socday.
4. Dariishadihii waan xiray maxaa yeelay, dabayl badan baa dhacaysa.
5. Raggii kale oo dhan waan la hadlay *laakiin* Cali ma arag.
6. Ma cuntay hilibkii mi*se* waad diiddey?
7. Cismaan xaashii u dir, Cali*na* ogeysii.

Layli:

1. *Xiriiriye kasta oo soo socda weer u habboon ku dar, hoosna ka xarriiq.*

   iyo, ee, mindhaa, maxaa yeelay, - ne, - se.

2. *Xiriiriyaha gefka ah tir oo mid ku habboon ku beddel.*

   Shalay waxaan la kulmay Jaamac *ee* waxaan weydiiyey goortuu magaalada yimid *oo* intuu joogay. Wuxuu *ama* ii sheegay inuu maalmo yar joogayo, ama uu jecel yahay inuu degdeg u noqdo *kolkaas,* geelii ee cid la'aan ah buusan sina uga maarmi karin.

3. Qor shan weerood oo mid kastaba "-se" weheliso.

## *Meeleeye*

Meeleeyuhu waa eray ka mid ah qaybaha hadalka. Had iyo jeerna wuxuu la shaqeeyaa falka, hortana wuu ka raacaa. Meeleeyaha waxa ugu shaqa badan afar eray oo lagu gaabsho "u, ku, ka, la".

*Tusaale*:

U - Macallinkii baan *u* sheegay.

KU - Gabar baa aqalka *ku* jirta.

KA - Lacagta maqalka *ka* saar.

LA - Yartii baa maqasha *la* joogta.

Layli:

1. Qor afar weerood oo ay ku kala jiraan meeleeyayaasha u, ku ka, la.

## *Yaab*

Yaabku waa eray ka mid ah hadalka, waana cod ama(*) sanqar lagu baraarugo.

Yaabku wuxuu u kala baxaa laba qaybood:

a) yaab dhawaaq. b) yaab kudayasho.

*Yaab dhawaaq*: Wax buu ku gelinsiiyaa:

1 *Farax*: alalo (Mashxarad) ! Alxamdu Lillaahi ! Kuu dhaley ! ! ! iwm.

2. *Naxdin*: Ba'a ! wah !, yur !, qad !, hus ! xax ! iwm.

3. *Tiiraanyo*: Jabay !, hoogey !, la ba' !, way iyo way ! iwm.

4. *Guubaabo*: Ka kaçaay !, Gurmadaay !, Uruuraay !, iwm.

5. *Cuskasho*: Ilaahayow !, Cabdulqaadirow !, Sheekh Uweysow !, iwm.

6. *Dhiillo*: Hayaay !, Waa wareey !, U,U,U,U, iwm.

*Yaab kudayasho*:

Waxa weeye sanqar dhacda oo loo dheg taago, ama eray afka laga yiraahdo, sida: qam, qac, dig, baf, shalalax, iwm.

Layli:

1. Erayadan waxaad u kala saartaa labada qaybood ee yaabka.
   aga, balanbalay, hoogey, la jab, ba'ay, jaw,
   dam, hiririg, Aabbow.

2. Waxaad qortaa saddex eray oo yaab sanqareed ah kana duwan tusaalaha kore.

# *Tusmada buugga*


Arar . . . . . . . . . . . . . . Bogga 3-4

Codadka . . . . . . . . . . . . . » 5

Qaybta hadalka . . . . . . . . . . . » 5

Qodob . . . . . . . . . . . . . » 5-7

Magac . . . . . . . . . . . . . » 7

Magac Guud . . . . . . . . . . . . » 8

Magac Gaar . . . . . . . . . . . . » 9

Cayn Magac . . . . . . . . . . . . » 10

Tiro Magac . . . . . . . . . . . . » 10

Keli iyo Wadar lab . . . . . . . . . . » 11-12

Keli iyo Wadar dheddig . . . . . . . . . » 12-13

Koox . . . . . . . . . . . . . » 13-14

Lammaane . . . . . . . . . . . . » 14-16

Magacuyaal dad . . . . . . . . . . . » 16-17

Magacuyaal lahaansho . . . . . . . . . . » 17-18

Magacuyaal tusmo . . . . . . . . . . . » 18-19

Magacuyaal su'aaleed . . . . . . . . . . » 19-20
Tilmaame . . . . . . . . . . . . . » 20
Tilmaame ahaansho . . . . . . . . . » 20-21
Tilmaame lahaansho . . . . . . . . . » 21-23
Tilmaame tusmo . . . . . . . . . . » 23-24
Tilmaame tiro . . . . . . . . . . . » 24-26
Tilmaame su'aaleed . . . . . . . . . » 26
F a l . . . . . . . . . . . . . . » 26-28
Fal ebyane . . . . . . . . . . . . » 28
Fal ma-ebyane . . . . . . . . . . . » 28-29
Fal gargaare . . . . . . . . . . . . » 29-30
Waqtiga falka . . . . . . . . . . . » 30
Habka falka . . . . . . . . . . . . » 30-31
Fal ahaansho . . . . . . . . . . . . » 31
Fal gudbe . . . . . . . . . . . . . » 31
Fal ma-gudbe . . . . . . . . . . . . » 31-32
Falkaab . . . . . . . . . . . . . . » 33-35
Xiriiriye . . . . . . . . . . . . . » 35-36
Meeleeye . . . . . . . . . . . . . » 37
Y a a b . . . . . . . . . . . . . » 37-38

Qayme, Sh. So. 4